



Ku soo dhawoow Swedish  
 Buug-gacmeedka ee Bukaanka iyo Qoyska  
 Welcome to Swedish  
 Patient and Family Handbook (Somali)



## Shaxda tusmada

Ku soo dhawoow Swedish	3
Warqad Ka Socota Agaasimaha Guud	4
Kooxda daryeelka caafimaadkaaga	5
Dhaqan badbaado	6
Joogitaankaaga Swedish	7
Diiwaanadaada caafimaadka	9
Tilmaamaha daryeelka caafimaadka	10
Xuquuqda bukaankaaga	11
Waajibaadka bukaanka	12
Liiska warbixinta bukaanka	13
Arrimaha biilasha	14
Faallooyinka iyo walaacyada	15
Ogaysiiska takoor la'aanta	16
Fiiro gaar ah	18
Sii Swedish	19

## Ku soo dhawoow Swedish

**1** 910, Swedish waxa ay ku bilaabantay cusbitaal yar oo leh hadafyo weyn oo adag: Inuu bixiyo daryeelka caafimaad ee ugu fiican gobolka, isaga oo isticmaalaya shaqaale tababaran iyo teknoolajiga iyo qalabka u dambeeya. Marka laga soo bilaabo xilligaas, Swedish waxay noqotay mid ka mid ah hay'adaha tabaruca caafimaadka ee loogu ixtiraamka badan yahay ee ku yaala Pacific Northwest, oo leh hadafka — in la siiyo bukaan kasta daaweyn heer sareh iyo daryeel tusaale fiican ah.


Kadib markii uu Nils Johanson, oo ah muhaajir ka yimid Sweden, uu yimid Ameerika dhammaadkii qarnigii 19-aad, isagoo aan aqoon wax af Ingriisi ah oo woxogaa yar oo doolar ahna sita, ayuu Denver ka qaatay shahaadada caafimaadka oo uu noqday dhakhtarka qalliinka. U guuristiisa Seattle, wuxuu ka qalbi jabay jiritaan la'aanta cusbitaallada heerka koowaad wakhtigaas wuxuuna go'aansaday inuu isagu mid dhiso. Markii uu lacag ka helay dadka Swidhishka ahaa ee muhaajiriint ahaa, ayaa Swedish Hospital laga furay First Hill. Laga soo bilaabo bilowgayagii, awooddayada aan ku sii koreyno ee aan isku sii beddelayno waxay si xoog leh ugu sii horumartay gargaarka laga helo bulshada darteed, taas oo door weyn ka ciyaarta horumarinta daryeelka caafimaadka ee gobolkayaga.

Tamar iyo dadaal la mid ah ta ku beerneyd Dr. Johanson ayaa ilaa hadda hagta dadka ka shaqeeya Swedish maanta. Xubin kasta oo ka mid ah kooxdayada daryeelka laga bilaabo farsamo-yaqaanada iyo kalkaalisoooyinka, ilaa dhakhtarrada iyo dhakhtarrada qalliinka, ayaa aad ugu dadaala si ay Swedish uga dhigi lahaayeen safka hore ee aqoonta caafimaadka, iyagoo ku tiirsan cilmi-baaris iyo teknoolajiyad horusocod leh, iyagoo ku dadaalaaya sidii ay u heli lahaayeen natijada ugu wanaagsan ee bukaanadayada.

Waxaanu rumaysannahay in khibraddaada halkan ay kaa dhigi doonto inaad dareento mid ku sugan oo ku kalsoon. Waxa sharaf noo ah inaad anaga na soo dooratay si aad ugu hesho daryeelka caafimaadka ee ugu sarreeya oo ay bixiyaan gacmaha dadka jecel shaqadooda, oo ah khabiirada waxa ay samaynayaan, oo ahmiyad siinaaya caafimaadkaaga, badbaadadaada iyo ammaankaaga.



SWEDISH FIRST HILL



SWEDISH CHERRY HILL



SWEDISH BALLARD

SWEDISH EDMONDS  
(Oggolaanshaha NBBJ)

SWEDISH ISSAQUAH

## In ka badan qarni oo shaqo fiicnaan ah



R. GUY HUDSON, Dhakhtar Caafimaad, MBA

Ilaa markii la aasaasay, himilada iyo ujeedada Swedish waxay ahayd in la horumariyo caafimaadka qof kasta oo aanu u adeegno. Inta uu Swedish isbeddelayey qarnigii la soo dhaafay, ahmiyaddayadii in bukaanku markasta ahmiyad leeyahay ayaa markasta isku mid ahayd.

Si aanu waayo-aragnimadaada kuugu dhib yarayno, ayaanu ugu soo saarnay buug-gacmeedkan si aanu kuugu sharraxno kooxdaada daryeelka iyo si aanu wax uga qabano walaaca ama su'aalaha aad qabi karto. Fadlan ha ka waaban inaad waydiiso xubin kasta oo kooxda daryeelkaaga ka mid ah ama shaqaalahayaga wixii sharraxaad dheeraad ah ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan joogitaankaaga ama daryeelkaaga. Waa muhiim inaad si firfircoon uga qaybqaadato daryeelkaaga oo Swedish oofiso waajibkeeda buuxinta baahi kasta oo aad qabto inta aad joogto.

Waxaanu fahmi karnaa in daryeel caafimaad ee lagu qaato cusbitaal ay xaalad walwal leh ahaan karto. Waxaanu ahmiyad siinaynaa sidii aan kuu siin lahayn daryeelka ugu heerka sarreeya iyo xannaanada ugu heerka sarraysa. Haddii lagu samaynaayo baadhitaan caadi ah, aad helayso daryeel xasaasi ah oo arrin caafimaad oo degdeg ah, ama aad ku jirto xaaladdaada ka soo kabashada, caafimaadkaaga iyo ka soo kabashadaadu waa ahmiyaddayada ugu weyn.

Anigoo u taagan kumanaanka daryeel-bixiyayaasha heeganka ah ee diyaarka u ah inay bulshadayada siiyaan daryeelka ugu tayada wanaagsan, waxaan kuugu mahadnaqayaa inaad u dooratay Swedish inuu ahaado daryeel caafimaad bixiyahaaga.

R. Guy Hudson, Dhakhtar Caafimaad, MBA  
Agaasimaha U Sarreeya

# Kooxda daryeelka caafimaadkaaga

## Dhakhaatiirka iyo dadka kale ee bixiya daryeelka caafimaadka

Waxaad la kulmi kartaa dhawr nooc oo dhakhaatiir kala duduwan xilliga aad joogto Swedish. Shaqaalahayaga caafimaad waxay ka kooban yihiin bixiyayaal Swedish u shaqeeya iyo sidoo kale bixiyayaal madaxbannaan oo gaarkooda ah. Dhakhtarka buuraha ah waa dhakhtarka, sida badan takhasus, kaasi oo agaasima daawaynta iyo daryeelkaaga cusbitaalka Marmarka qaar ayaa dhakhtarrada cusub ay caawin doonaan dhakhtarka buuraha ah (daryeel-bixiyayaashan waxay dhammeeyeen dugsiiga caafimaadka waxayna qaadanayaan tabobar dheeraad ah iyadoo uu korka kala socdo daryeel-bixiyaha buuxaa).

Dhakhtarkayga buuraha ah waa: \_\_\_\_\_

Dhakhtarkayga cusub waa: \_\_\_\_\_

Kalkaalisadaydu waa: \_\_\_\_\_

Kaaliyaha dhakhtarkaygu waa: \_\_\_\_\_

## Cusbitaalaha (dhakhtarka ka shaqeeya cusbitaalka oo kaliya)

Dhakhtar kale oo aad la kulmi karto cusbitaalaha. Wuxuu kaliya ka shaqeeya cusbitaalka, isaga oo daryeelaya bukaanada marka adeeg-bixiyayaasha buuraha ah ayna joogin. Iyadoo la isku xidhayo dhakhtarkaaga, kalkaalisadaada, iyo maareeyaha kiiskaaga, waxay kaa caawin karaan sidii aad u heli lahayd daryeel khibiirnimada saacad kasta.

Cusbitaalahaaga waa: \_\_\_\_\_

## Kalkaaliyayaasha

Kalkaaliyayaasha diiwaangashan (RNs) iyo kalkaaliyayaasha liisankooda la aqoonsaday (IPNs) ayaa ah dadka bixinaaya daryeelkaaga sariirta marka aad ku jirto cusbitaalka. Ka dib qorshaha daawaynta daryeel-bixiyahaaga iyo qorshaha daryeelka kalkaalisadaada, waxay ku siin daawooyin, la socon calaamadahaaga muhiimka ah, kugu dhiirigalin kaqaybgalkaaga buuxa ee daryeelkaaga waxayna hubin in aad ugu qanacsan tahay sida ugu suurtoogashan. Iyadoo ay ka go'an tahay caafimaad-qabkaaga iyo ammaankaaga, kalkaaliyayaashu waxay kuu yihiin u-doodayaal waxayna kaa caawiyaan in aad baratid xaaladdaada waxayna ka jawaabaan wixii aad su'aalo qabtid.

Kalkaaliyayaashaydu waa: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

## Maareeyayaasha kiiskaygu waa

Xilliga aad cusbitaalka ku jirto, ayaa maareeye kiis diyaar kuu yahay. Maareeyaha kiiska ayaa kala shaqayn doona adiga iyo xubnaha kale ee kooxda cusbitaalka isku-xidhka qorshaha daryeelkaaga marka aad ka baxdo cusbitaalka. Maareeyaha kiiskaaga ayaa ka jawaabi kara su'aalaha laga yaabo inaad ka qabtid caymiska inta aad halkan joogtid, oo hubiya inaad uga baxdid Swedish oo u aaddid gurigaaga ama heer kale oo daryeel sida ugu fudud ee suurtoogalka ah.

Maareeyaha kiiskayga waa: \_\_\_\_\_

## Daryeelayaasha kale

Dad ku takhausay meelo badan ayaa jooga si ay uga dhigaan joogitaankaaga mid raaxo badan kaana caawiyaan inaad dhakhso u bogsato. Waxaa ka mid ah kuwan daabiibayaasha jidhka, neefsashada iyo shaqada, iyo sidoo kale farsamo-yaqaanada shaybaadhka, shaqaalaha sawirrada baadhitaanka, khabiirada cuntada, farmasiilayaasha, caawiyayaasha kalkaaliyayaasha ee la aqoonsan yahay, shaqaalaha bulshada iyo wadaadada. In kastoo laga yaabo in aadan u baahan adeegyadooda inta aad halkan joogto, waxa ogaataa inaad heli karto haddii aad rabto.

Magacyada daryeelayaasha aan doonayo in aan xasuusto:

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_



# Dhaqan badbaado

## Nadaafadda gacanta



Si loo yareeyo faafitaanka jeermiska loona abuurto jawi badbaado ah dadkayaga bukaanka ah, Swedish Medical Center (Xarunta Caafimaadka Swedishka) waxay ku qasbaysaa in dhammaan daryeelayaasha ay ku dhaqaan gacmahooda, jeelka alkahoosha leh ama saabuun iyo biyo, ka hor iyo ka dib marka ay qol galayaan.

Waxaan ugu baaqaynaa in dadka soo booqdaa ay sidaas oo kale sameeyaan oo saabuun ama jeelka la siiyay isticmaalaan. Si aanu badbaadada bukaankayaga u ilaalino, waxaan codsanaynaa in booqdayaasha xanuunsanayaa aanay soo booqan bukaanada jiifa cusbitaalka.\*

## Sababta aad ugu badbaadi ee aad ammaan ugu sugnaa markaad joogto Swedish

Badbaadada bukaanka ayaa Swedish ah ahmiyadda ugu weyn. Swedish waxay qaadataa kaalin firfircoon sidii loo yarayn lahaa tirada iyo inta jeer ee shilalka, khaladaadka, dhaawacyada iyo caabuqyada. Waxaan waqti iyo tamarta joogto ah u hurnaa si aanu u abuurno oo si joogto ah u hagaajino hannaanyada iyo nidaamyada badbaadada. Shaqada aanu hore u qabanay ayaa isbeddel keentay, welina waxaan u baahannahay in ay nala shaqayso. Haddii aad qabto wax walaac ah, waa CAADI inaad ka hadasho ama su'aal waydiiso. Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida Swedish u qiimayso badbaadada bukaanka, booqo [Swedish.org/about/quality-and-patient-safety/quality-information-sources](http://Swedish.org/about/quality-and-patient-safety/quality-information-sources).



## Ku waydiinta magacaaga

Mid ka mid ah siyaabaha ugu cad ee loo kordhiyo badbaadada bukaanka waa wax aad dareemi doonto inta aad joogto cusbitaalka. Daryeelayaasha kala duwan, xitaa kuwa aad horay u aragtay, ayaa si joogta ah magacaaga iyo hayb-sooc kuu gooni ah ku waydiin doona (sida taariikhda dhalashadaada). Tani waxay dhici doontaa ka hor intaadan qaadan wax daawo ah, daawayn ah, hannaanyo ama cunto ah. Maya, maanu illaawin cidda aad tahay. Waa wax fudud in la xaqijiiyo si la hubiyo in qofka saxda ah uu helo daryeelka saxda ah.

Dhinaca kale, marnaba uma baahan doontid inaad waydiiso magacyada daryeelayaasha, sababtoo ah waxay ku daabacan tahay summadda rasmiga ah ee magac shaqaalaha Swedish, oo ay la socdaan sawirro iyo magaca waaxda. Dhammaan shaqaalaha waxa laga rabaa inay gashadaan calaamad-magac, taas oo kuu oggolaanaysaa inaad si fudud oo dhaqso ah u aqoonsato cidda daryeelka ku siinaysa.

## Kahortagga dhicitaanka

Dhawr shay ayaa ka dhiga dhicitaanada mid halis badan cusbitaalka marka loo eego meelaha kale. Qaar ka mid ah daawooyinka, Meelo aanu qofku aqoon iyo itaaldarrida jirka ayaa dhammaan waxay keeni karaan dhicitaan, taas oo keeni kara dhaawac iyo gaabis ku yimaadda bogsashadaada. Waxaan bixinaa biraha dhinacyada sariirta oo aanu ku siin sharabaadada aan sii-siiban si ay kaaga caawiyaan inaad ka hortagto inaad dhacdo inta aad halkan joogto. Intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa in lagaa kaalmeeyo aadista musqusha laguna tuso sida loo isticmaalo cuskadyada gacanta, tukubayaasha ama bakooraadaha.

## Kaalmo u yeedhashada

Xitaa marka aad qol kaligaa joogto, ayaa markasta qof kugu dhow yahay si uu kuu hubiyo oo uu si kasta kuugu caawiyo. Waxa aad samaynaysaa uun waa cadaadinta badhanka wicitaanka fudud kadibna qof ayaa kuu jawaabi inyar kadib.

## Kaa caawinta inaad dhaqaaqdo

Daryeelayaashaada ayaa kugu dhiirigalin doona dhaqahaqaaq joogto ah si ay kaaga caawiso soo kabashadaada. Si aanu kaaga caawino luudidda iyo dhaqahaqaaqa daryeelahaagu waxa uu isticmaali karaa qalab khaas ah. Haddii aad u baahan tahay isticmaalka qalabka noocan ah, daryeelahaaga ayaa ku siin doona talooyin iyo tilmaamo.

\*Sawirka waxa qaaday Ururka Xirfadlayda ee Xakamaynta Caabuqa iyo Ibdhimoolajiga (APIC)

# Joogitaankaaga Swedish

## Kasbashada isgaadhsiiin heer sare ah

Isgaadhsiiin hufan oo u dhaxaysa bukaanada, cidda la socota iyo daryeelayaasha ayaa muhiim u ah daawayn badbaado leh oo wakhti ku habboon la qabtay. Haddii Ingiriisigu aanu ahayn luuqad aad doorbidayso ama haddii aad qabto dhago la'aan, hadalka oo kugu adag ama/iyo aragti la'aan, Swedish waxay bixisaa turjumaano caafimaad oo xirfad leh wax ka badan 200 luqadood iyo lahjadood, intaa waxa dheer turjumaanada luuqadaha dhagoolka iyo waxyaalaha kale ee isgaadhsiiinta caawiya sida waxyaalaha kaa caawiya maqalka, agabka bukaanka oo tarjuman, Farta Indhoolka iyo adeegyada CART, iyo qoraalada shaashadeedka (meesha la heli karo). Turjumaanada xirfadda leh iyo adeegyada isgaadhsiiinta waxa laga heli karaa 24/7 dhammaan kambasyada Swedish, waana **bilaash**. Ma oggolaano inay turjumaanada caafimaad noqdaan xubnaha qoyska, saaxiibada ama carruurta, laakiin waxaanu dhiirigalinay inay ahaadaan taageeradaada oo, marka aad oggolaato adiguna, aanu la wadaagno macluumaadkaaga marka loo baahdo. Fadlan hore noogu soo sheeg baahidaada gaarka, haddii ay suurto tahay.

## Kugu abuurista degganaansho

Inkastoo laga yaabo inay xanuun iyo raaxo darro imaan karto inta aad bugto, hadafkayagu waxa weeye inaan kugu abuurno degganaansho si aad uga qaybqaadato daryeelkaaga maalinlaha oo aad u nasato una raaxaysato. Waxaanu ku waydiin doonaa inaad isticmaasho miisaanka xanuunka ee 0-10 si aad ugu qeexdo xanuunkaaga. Waanu kaala hadli doonaa inta badan heerka degganaanshahaaga iyo sida ay daawooyinka iyo daawayntu ay wax kuugu tarayaan. Waxaanu kaa caawin doonaa si aad dhinaca aad u jifto u beddesho marka loo baahdo waxaanu ku siin doona dabiibiyada kulka, qaboojinta ama farsamooyinka kale ee ku caawinaaya. Fadlan u sheeg kooxdaada haddii uu heerka xanuunkaagu kuu diidaayo inaad kaqaybqaadato soo kabashadaada, haddii uu jiro wax is beddel ah dareenka xanuunkaaga, meesha ku xanuunaysa, ama haddii daawada xanuunka biisaa ay kaaga tagayso si ka dhakhso badan sida la filayey. Waxaanu samayn doonaa dadaal kasta, laakiin waxa laga yaabaa inaanu kaa wada qaadin dhammaan xanuunka iyo raaxo la'aanta.



## La xidhiidhista saaxiibada iyo xubnaha qoyska

Ku wargelinta dadkaaga iyo saaxiibadaa xaaladdaada waa shaqo muhiim oo daruuri ah. Si ay u fududaato waqti yarna u qaadato, waxaan ku talinaynaa in la isticmaalo adeeg web oo lacag la'aan ah, ammaan ah oo gaarka ah oo loo yaqaan CaringBridge. Waxay kuu oggolaanaysaa inaad samayso bogga interneted oo kuu gaar ah ooaad ku soo bandhigo sawirrada, fiidyowiyada iyo qoraalada. Haddii aad rabto inaad wax badan ka barato, booqo barta [Caringbridge.org/swedish](http://Caringbridge.org/swedish).

## Dhegaysiga naxariista

Markaad tahay bukaan, xubin qoys ama asxaab cusbitaal joogta, waxa laga yaabaa inaad waajahdo wakhti adag oo saameeya jidhkaaga, maskaxdaada iyo ruuxdaada. Halkan Swedish waxanu isku dayeynaa inaanu buuxino baahi kasta oo niyadeed ama ruuxi ah oo aad yeelan karto. Wadaado kiniisadeed ayaa jira oo ku wacdiyi, aad kala hadli walaacaaga, kaa caawin inaad isdejiiso ama tukato haddii aad codsato. Fadlan u sheeg daryeelaahaaga haddii aad rabto qof aad la hadasho. Wadaadada kiniisaddu waxay u adeegaan dadka dhammaan diimaha, oo ay ku jiraan kuwa aan isu aqoonsan inay diin ama caqiido haystaan. Dhegaysiga naxariista leh ayaa diyaar u ah dhammaan dadka.

## Tilmaamaha booqdaaha

Waxaanu aaminsanahay in joogitaanka saaxiibo iyo qaraabo ku taageeraysaa ay caawiso inaad dhakhso u bogsato iyo inay kaa dhigto inaad dareento degganaan iyo raaxo. Waxaanu kugu dhiirigalinaynaa inaad ku martiqaado cid kasta inay ku soo booqdaan inta aad halkan joogto. Dhinaca kale haddii uu jiro qof aanad rabin inuu ku soo booqdo, noo sheeg markaas oo waxaanu hubin doonaa in codsigaaga meel mariyo.

Marmarka qaarkood baahidaada nasashada iyo daawaynta, ama joogitaanka bukaan kale ee qolka, ayaa u baahan kara in ay kalkaalisadu dhinto tirada booqdayaasha iyo/ ama inta ay joogayaan. Kalkaalisadaada ayaa kuu sheegi doonta haddii ay jiraan wax ah xannibaadaha gaarka ah ee booqduhu. Si ay noogu oggolaato inaanu la socono dadka cusbitaalka jooga, waxaanu u baahan doonaa inaanu siino kaadhahd aqoonsi booqdayaashaada haddii ay halkan joogaan xilli aan haayn saacadaha booqashada ee caadiga ah (5 g.h. ilaa 9 g.d.). Qaybaha qaar Swedish waxa looga baahan yahay booqdayaasha inay xidhnaadaan kaadhahd aqoonsiga markasta.

Dhammaan booqdayaasha waxa laga sugayaa inay u dhaqmaan hab ixtiraam iyo qaddarin leh. Kuwa sidaas yeeli waaya waxa loo sheegi inay baxaan. Fadlan waxa lagaa codsanayaa in booqdayaasha qaba cudurada faafa (sida qufaca, dureyga, hargabka, hablobaasta, jadeecada iyo qaamo-qashirka) aanay iman cusbitaalka, halkaas oo ay qaadiin karaan adiga ama dadka kale ee meesha.

### **Ku xidhmidda Swedish**

Inta aad halkan joogtaan iyo marka aad guriga ku soo noqoto, waxaanu ku siinaa dhawr siyaabood oo kala duwan oo aad wax kaga barato talooyinka caafimaadka, waxyaalaha casriga ah ee ugu danbeeyey teknoolajiyadda caafimaadka, iyo mawduucyo kale oo xiiso badan u leh dad badan oo kala duwan.

Fadlan booqo [Swedish.org/about/engage](http://Swedish.org/about/engage) iyo kaga xidhnaw Swedish barta Facebook, Twitter, Google iyo YouTube. Intaa waxa dheer, waxa aad gali kartaa Bologga Swedish ee [Swedish.org/blog](http://Swedish.org/blog). Si aad ugu hesho qaybta warqadda ee warsidahayaga saddex biloodlaha HealthWatch boosta, fadlan ku soo dir magacaada iyo cinwaanka boostada [swedish@mail-ad.com](mailto:swedish@mail-ad.com) ama wac 206-386-6797.

### **Internet bilaash ah**

Si aad ula xidhiidho ciddaada ama iimeylka u hubiso, waxaanu siin xidhiidhka Internet oo bilaash ah adiga iyo booqdayaashaada. Waxaad kale oo aad u isticmaali kartaa xidhiidhkan si aad u hesho macluumaadka caafimaadka ee boggayaga internetka: [Swedish.org](http://Swedish.org).

### **Alaabta qofku leeyahay**

Dadaalka lagu hubinaayo ammaanka iyo nabadgelyada qof walba oo jooga Swedish, waxaanu xaq u leenahay inaanu baadhno waxyaabaha boorsooyinka ama bacaha ku jira. Hannaankan waxa sheegaya foomka Shuruudaha Dhigitaanka Cusbitalaalka ee aad saxeeyday, waxaanu noo oggolaadaa inaanu baadhno waxyaabaha sida hubka iyo daroogada sharci darrada ah.

### **Tilmaamaha sigaar-cabbista**

Si loo ilaaliyo caafimaadka bukaanada, booqdayaasha iyo shaqaalaha, sigaarka, saakarrada, shiishadda, sigaarka elektarooniga ah ama tubaakada canka la dhigo gudaha ama agagaarka xarunta Swedish waa ka mamnuuc. Kalkaalisadaada ayaa ku waydiin doonta haddii aad jeclaan lahayd caawimo inaad joojiso tubaakada. Daraasado ayaa muujiyay in haddii la adeegsado barnaamij sax ah ugu dhawaan cid kasta ay joojin karto sigaarka. Mararka qaar joogitaanka cusbitaalku waxa uu keena dhiirigalin heer sare ah oo lagu joojiyo. Fadlan waydii kalkaalisadaada wixii macluumaad dheeraad ah ama wac 1-800-QUIT-NOW.

### **Siyaasadaha ku saabsan ilaha kale ee qiica ama bololka**

Inkasta oo aan fahamsanahay in fooxa ama shumacu noqon karaan dhaqan diimeed ama hab dhaqameed, haddana ma oggolaano in midna lagu isticmaalo xarun kasta oo Swedish sababta oo ah suurtoagalnimada inay keenaan dab ama yareeyaan tayada hawada. Meesha kaliya ee shumacu uu habboon yahay waa mid kamid ah kiniisadahayaga, iyada oo ogaysiis la sii bixinayo.

### **Urta iyo shucuurta**

Maadaama urta xoogga leh ay dad kale ka cadhaysiin karto oo ay ku keeni karto khatar caafimaad, waxaan codsanaynaa in qof kasta oo gala xarunta Swedish ka dhawrsado isticmaalka cadarrada, kiriimka jirka ama barafuunka.

### **Xayawaanka**

Eyda dadka caawisa (ama baqlaha) ayaa lagu soo dhaweeyaa xarunta kasta oo Swedish ah. Cusbitalada King County ayaa sidoo kale waxay oggalaadaan daawaynta xayawaanka Saaxiibka ah. Rabbbaayadaha la oggola. Daryeelka iyo kormeerka xayawaanka dadka caawiya ama dabiibka xayaawaanka wehelka ah kaliya waa masuuliyadda qofka leh. Xayawaanka waa inuu si buuxda uga masuul noqdo una maamulo qofka muddakarka ah ee wataa. Shaqaalaha Swedish Medical Center awood uma leh inay siiyaan daryeel, cunto, qurxin, waxqabad ama meel gaarka ah xayawaanka. Haddii joogitaanka iyo habdhaqanka xayawaanku uu khatar ku yahay caafimaadka ama badbaadada, waxa ay u baahan doonaan inay ka baxaan xarunta.

### **Sawirrada, fiidyowiyada iyo anshaxa asturnaanta**

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay asturnaan marka uu shaqaynaayo, booqanaayo ama lagu daawaynayo xarunta Swedish. Fadlan ixtiraam xuquuqda asturnaanta ee dadka kale inta aad halkan joogto, hana ka duubin cajalado maqal ah ama ha ka qaadin sawirro ama ka duubin filimo bukaanada, booqdayaasha ama shaqaalaha, haddii aanad helin oggolaanshahooda oo qoran. Duubista fasax la'aanta ahi waa dambi gobolka Washington.



# Diiwaanadaada caafimaadka

## Sida aanu u ilaalino macluumaadkaaga caafimaad ee shakhsiga ah

Waxay Swedish u maaraysaa macluumaadka caafimaadkaaga si adag oo waafaqsan sharciyada asturnaanta ee federaalka iyo gobolka. Waxaad ka arki kartaa qodobada gaarka ah ee tilmaamahayaga asturnaanta adigoo codsanaya nuqul ka mid ah Ogaysiiska Ku-camalfalka Asturnaanta, oo lagu heli karo luuqado kala duwan. Yara waydii daryeelahaaga ama ka fiiri bogga internetka cūa [Swedish.org/medicalrecords](http://Swedish.org/medicalrecords). Ama wac 206-215-2613 si aad u codsato nuqul qoraal ah.

## Sida aad ku heli karto diiwaankaaga caafimaadka

Waxay MyChart bixisaa in onlayn lagu helo qaybo ka mid ah diiwaankaaga caafimaadka ee elektrooniga ah (EHR). Waxay kuu suurtoogalinaysaa inaad si ammaan ah u isticmaashid Internetka si aad u hesho oo aad u maarayso macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga. Waa hab fiican si aad ugu isticmaasho kombiyuuter ama telefoonka casriga ah eegista taariikhda caafimaadkaaga, natiijooyinka baadhitaanka shaybaarka, ugu samaysato ballamo, ugu dalbato dib u soo qaadashada daawada iyo waxyaalo dheeraad ah. Waa mid asturan oo dhibyar in la isticmaalo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan koontooyinka MyChart, booqo: [Swedish.org/landing-pages/swedish-mychart](http://Swedish.org/landing-pages/swedish-mychart).

## ka dalbo nuqul diiwaankaaga caafimaadka Fasixidda Macluumaadka (Release of Information (ROI)):

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul ka mid ah diiwaankaaga caafimaadka adigoo soo gudbinaya codsi qoraal ah. Waxaad dooran kartaa Codsiga Bukaanka ee Foomka Helitaanka ama u qor warqad leh qaybaha loo baahan yahay ee soo socda:

1. Uu saxeexay shakhsigu (bukaanka)
2. Si cad u sheeg qofka loogu talagalay inuu helo diiwaanada
3. Caddee meesha loo dirayo nuqulka macluumaadka caafimaadka ee dhawrsoon

Baakad ay ku jirto waxa aad u baahan tahay inaad ogaato si aad u codsato diiwaankaaga sidoo kale waxaa laga heli karaa Miiska Macluumaadka cusbitaalka, ama waxa aad booqan kartaa [Swedish.org/medicalrecords](http://Swedish.org/medicalrecords). Waxaad kala xidhiidhi kartaa Fasixidda Macluumaadka 206-320-3850 wixii macluumaad dheeraad ah.



# Tilmaamaha daryeelka caafimaadka

## **Ku saabsan wixii “Dardaaran Dambe” iyo dardaaranada hore ee kale ah**

Dardaaranaka hore waa tilmaamo qoraal ah oo noo sheegaya waxa uu yahay daawaynta caafimaad ee aad rabto ama aanad rabin haddii ay dhacdo in aanad awoodin inaad qaadata go'aanadaas adigu. Ka hor inta aan la abuurin ee aan la saxeejin dokumentiyadan, waxa aanu kugula talinaynaa inaad kala hadasho xubnaha qoyska, saaxiibada ama la-taliyayaasha diinta. Xilliga lagu dhigo ama booqashada dhigitaanka ka horraysa ee qalliin ka hor, waxa lagu waydiiin doonaa inaad leedahay Dardaaranaka Hore ee Daryeelka Caafimaadka (mararka qaar loo yaqaan “dardaaranaka dambe”), Awood Joogtada ah ee Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka (qof loo qondeeyey inuu kuu gaadho go'aamada daawaynta adiga haddii aanay kuu suurto gal ahayn inaad sidaas samayso), iyo haddii aad rabto inaad xudin jidhka ku deeqdo. Marka aad oo gasho subsitaal, u dhiib dardaaranada daryeelka caafimaadka, haddii aad leedahay, kalkaalisada ku dhigaysa, taas oo ku dari doonta diiwaankaaga caafimaadka. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku sabsan helitaanka dardaaranada daryeelka caafimaadka waydii adeegahaaga bulshada ama kalkaalisada.

## **Goorma ayaa CPR la isticmaalaa?**

Swedish waxay isticmaashaa Soo Noolaynta Wadnaha-Sambabka CPR (Cardio-Pulmonary Resuscitation) marka wadnaha iyo sambabada qofku si lama filaan ah shaqada u joojiyaan. Waxay inta badan ku lug leedahay in laabta la riixo, isticmaalka daroogada iyo/ama shoog koronto ah si la iskugu dayo in garaaca wadnaha diib loogu soo celiyo, iyo in tuunbo la galiyo hunguriga cad si loo sii wado neefsashada. Bukaanaada aan rabin CPR waa inay wataan amar dhakhtar oo qoraal ah oo sheegaya inay yihiin bukaan Soo Noolayn ha ku Samayn DNR (Do Not Resuscitate). Go'aanka in la noqdo bukaan DNR ama in aan la helin waxyaalaha kale ee daawaynta nolol haynta ayaan ka hor istaagayn bukaan inay helaan daryeel.

## **Waa maxay POLST?**

Marka laga tago dardaaranaka, bukaanadu waxay dooran karaan inay ku daraan dokumenti ay ka heleen dhakhtarkooda oo la dhaho foomka POLST. POLST wuxuu u taagan yahay Amarka Dhakhtarka ee Daawaynta Nolol Haynta. Dokumentigan waxaa lagula taliyaa qof kasta oo qaba xanuun wayn oo nololsha halis ku ah ama dhulyaalnimo muddo socotay. Bixiyayaashu waxay isticmaalaan POLST si ay u matalaan rabitaanka bukaanaka oo cad oo wata amaro caafimaad oo gaar ah oo muujinaya noocyada daawaynta nolol haynta ay rabaan ama aanay rabin dhammaadka nololsha.

## **Waa maxay Dardaaranaka Hore ee Caafimaadka Dhimirka?**

Dardaaranaka Hore ee Caafimaadka Dhimirka waa dokumenti kuu oggolaanaya in aad qorto sida aad jeclaan lahayd in daawaynta caafimaadka dhimirkaaga loo maareeyo mustaqbalka. Waa sida Dardaaran Dambe uun. Waxay dhaqangeli doontaa oo kaliya haddii ay dhacdo in aad noqoto “mid talaxgabay” — aan awoodin inuu sameeyo doorashooyin sax ah sabab ku lug leh cudurka dhimirka. Waxaad samayn kartaa dardaaranaka qof kale siinayaa amar sharci ah si ay kuugu qaataan go'aanada caafimaadka dhimirka, oo waxaad qori kartaa tilmaamo ku saabsan noocyada daawaynta ee aad rabto ama aadan rabin in aad hesho. Dardaaranaka Hore ee Caafimaadka Dhimirka waxaa oggol sharciga gobolka Washington.

## **Caawi qaadashada go'aanada anshaxa ee adag**

Mararka qaar bukaanada iyo qoysaskooda waxa soo waajaha go'aano daawayn oo kakan. Guddigayaga Anshaxa — oo ka kooban dhakhaatiir, kalkaaliyayaal iyo adeegyaaasha bulshada kuwaas oo waxa danta u ah bukaan maskaxda ku haya — ayaa la heli karaa 24/7 si loola tashado haddii adiga ama qoyskaagu aad u baahan tihiin caawimo inaad go'aamadan gaadhaan. Kalkaalisadaada ayaa ku siin karta macluumaad dheeraad ah.

## **Hadiyadda ku deeqidda xubin jidh**

Ahaanshaha ku-deeqe xubin waa tallaabo deeqsinimo iyo jacayl taasi oo samayn karta isbeddel wayn oon ku koobnayn nolol kaliya, laakiin ilaa 50 nololood gaadhaysa! Baahidu waa mid aad u badan, maanta ayaa ilaa 120,000 qof ay yihiin dad ku jira liistada sugitaanka xubinta jidhka ee Maraykanka, iyadoo qaar badani ay sanado badan xanuunsanaan doonaan ka hor inta ayna helin qof ku deeqa oo ku haboon. Sida badan qoysaska ku-deeqayaasha xubintu waxay sheegaan in murugadoodu yaraato marka ay og yihiin in xubnihii dadkoodu ay u keenayaan nolol cusub dad kale. Haddii aanad hore adigu u shaacin inaad tahay ku-deeqe xubin, kala hadal qoyska iyo saaxiibadaa.

Si aad wax dheeraad ah uga barato, booqo websaytka Life Center Northwest: [Lcnw.org/](http://Lcnw.org/) or Donate Life Today at [Donatelifetoday.com](http://Donatelifetoday.com) ama wac 1-877-275-5269.

# Xuquuqda bukaankaaga

**Swedish Medical Center waxay doonayaan inaad ogaato xuquuqda aad leedahay bukaan ahaan. Waxaanu samayn doonaa wax walba oo suuragal ah si aan u hubino in la qaddariyo xuquuqdaada. Haddii aad tahay bukaanka Swedish, waxaad xaq u leedahay:**

- Ku codso, ku qaabil ama ku diid booqdayaasha (ama cid ku matalaysa) go'aankaaga, haddii aanay jirin baahi daawayn ama xadayn suurto gal ah.
- Inay kuula dhaqmaansi daacad ah, sharaf leh oo qaddarin leh dhammaan shaqaalaha cusbitaalku.
- In qiyamkaaaga iyo rumaysnaantaada shakhsi, dhaqameed iyo ruuxeed la taageero marka la qaadanayo go'aan daawayn.
- In qof aad doorato iyo dhakhtarkaaga si degdeg ah loo ogaysiiyo cusbitaalka lagu dhigay.
- Ka hadasho wax kasta oo cabasho ah ee aad qabto ee ku saabsan daryeelkaaga iyadoo aanad ka cabsoonayn inaad hesho daawayn ka xun. Si haddaba dhibaatooyinkaaga dib loogu eego waqtiga ugu habboon oo caawimaad ama u-doodis la socoto marka loo baahdo oo, marka ay suurto gal tahay, waqtiga saxda ah la xalliyo. Waxaad xaq u leedahay in qoraal lagugu ogaysiiyo jawaabta walaaca aad qabto.
- Inaad taqaano magaca iyo mansabka daryeelayaashaada.
- Aad og tahay in daryeelkaaga uu ku lug leeyahay tabobaridda bixiyayaasha daryeelka caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay in aad oggolaato ama diido inaad kaqaybqaadato.
- Aad hesho macluumaad dhammaystiran oo cusub oo ku saabsan cudur-sheegistaada, daawayntaada iyo saadaasha cudurka si aad adigu fahmi karto. Waa in sharraxaadda oo idil ay ku jiraan:
  - Qeexitaan hannaanka ama daawaynta, iyo sababta loo samaynayo
  - Faa'iidooyinka imaan kara
  - Saamaynaha xun, khataraha ama carqaladaha ee la ogsoon yahay
  - Dhibaatooyinka imaan kara xilliga ka soo kabashada
  - Fursadaha in la guulaysto
  - Hannaanyada ama daawaynaha kale ee la samayn karo
- Hel turjumaan ama gargaar isgaadhsiineed haddii aadan ku hadlin Ingiriisi, Ingriisigu uu yahay luuqaddaada labaad, ama haddii aad tahay dhagoole, maqalku kugu adag yahay, aanad waxba arkayn, kala-dhantaalan tahay garasho ahaan, ama leedahay nafo hadalka ah. Isgaadhsiinta loogu talagalay da'daada iyo baahidaada ayaad heli-doontaa. Adeegyada turjumaanka xirfadda leh iyo qalabka caawinaadda waxaa lagugu siinayaa lacag la'aan.
- Kala qaybqaado dhakhaatiirtaada iyo dadka kale ee daryeel caafimaadka bixiya qorshaynta daryeelkaaga.
- Laguu sheego natiijooyinka daawayntaada, wixii fiican iyo wixii xunba, waxa la filayo ama aan la filanaynba.
- Codsato oo ku hesho diiwaanada caafimaadkaaga waqti macquul ah iyo sharraxaad wax walba oo ka mid ah diiwaankaaga.
- Diiddo hannaanka, daawada ama daawaynta iyo in la wargeliyo natiijooyinka ka dhalan kara go'aankaaga.
- Noqoto mid ka xor ah xannibaad ama ka faquuqid lagu soo rogo iyada oo loo marayo qasab, edbin, qancin ama aargoosi. Xakamayn ama ka faquuqid waxa kaliya loo isticmaali doonaa si loo sugo badbaadada degdeg ah ee jidheed ee bukaanka, shaqaalaha ama dadka kale ee cusbitaalka jooga, oo waa la joojin doonaa sida ugu dhakhsaha badan marka uu dhaqankaasi dib khatar ugu ahayn badbaadada.
- Samayso dardaaranada hore ee daawaynta, sida Awoodda Qareenka ee Joogtada ah ee Daryeelka Caafimaadka iyo Dardaaranka Dambe, ama Amarka Dhakhtarka ee Daawaynta Nolol Haynta (POLST), iyo in daryeelayaashu raacaan rabitaanadaada. Macluumaad dheeraad ah ayaa lagu heli karaa codsi.
- Asturnaanta shakhsi ahaaneed, ilaa xadka waafaqsan baahiyaha daryeelkaaga. Ka wada-hadalka, la-tashiga, baadhitaanka iyo daawaynta kiiska ayaa la samayn si loo dhwro asturnaanta bukaanka kasta.
- Baro dhakhtarka sida gaarka ah uga masuulka ah daryeelkaaga, iyo weliba dhakhaatiirta kale ee laga yaabo inay talo ku leeyihiin kiiskaaga.
- In dhammaan isgaadhsiinta iyo diiwaanada la xidhiidha daryeelkaaga lagu ilaaliyo qarsoodi.
- Daryeelka taageerada ah, oo ay ku jiraan qiimayn habboon iyo maaraynta xanuunka, daawaynta calaamadaha raaxo darrada ah iyo taageeridda aad u baahan tahay ee niyadeed iyo ruuxeed, iyadoo aan loo eegin xaaladda cudurkaaga ama go'aanada caafimaadka.
- Aad ku hesho daryeel goob badbaado leh, oo ka madhnaato nooc kasta oo tacaddi ah ama dhibaataayn ah, iyo inaad hesho adeegyada dhawrised.
- Ka codso gargaar (oo ay ku jiraan codsiyada qoyska ama booqshadaha) Guddiga Anshaxa Swedish marka la eego su'aalaha ama arrimaha anshaxa ee ku xeeran daryeelkaaga.

- Laguu gudbiyo xarun kale marka aad codsato ama marka ay caafimaad ahaan ku habboon tahay ee ay sharci ahaanna bannaan tahay. Waxaad xaq u leedahay in si dhammaystiran laguugu sharraxo sababta lagu wareejinayo iyo haddii ay jiraan waxyaabo lagu beddeli karo. In xarunta lagu wareejin doono ay marka hore bukaan ahaan ku oggolaadaan.
- Ogow haddii daryeelkaaga ku lug leeyahay hababka daawaynta cilmi-baadhis ama tijaabada, iyo in lagu ilaaliyo inta lagu guddo jiro cilmi-baadhista iyo tijaabada caafimaad. Waxaad xaq u leedahay in aad oggolaato ama diido inaad kaqaybqaadato. Diiditaanka inaad kaqaybqaato iskama kaa hor istaagayso isticmaalka mid kastoo ka mida daryeelka Swedish.
- Laguu sheego xilliga aad ku jirto cusbitaalka fursadaha daryeelka bukaan marka aan daryeelka cusbitaalka loo baahnayn. Waxaad xaq u leedahay inaad kaqaybqaadato qorshaynta marka aad cusbitaalka ka baxayso.
- Eeg biilkaaga oo hel sharraxaad kharashaadka iyadoo aan loo eegin sida aad u bixinayso kharashka daryeelkaaga.
- Baro xeerka, hannaanyada, qawaaniinta ama shuruucda cusbitaalka ee khuseeya daryeelkaaga.
- Adiga ama wakiilkaaga ha ka qaataan go'aanno ku dhisan xogogaalnimo daryeelkaaga.
- Ku darto xubnaha qoyska ama dad kale oo muhiim ah go'aamada daryeelkaaga.
- Hesho, codsato si aad ugu samayso wax ka beddel, oo hel macluumaad ku saabsan shaacinta macluumaadka caafimaadkaaga, si waafaqsan sharciga khuseeya.
- Xogogaal u noqoto waxyaalaha ku saabsan natiijooyinka aan la filayn ee daryeelka, daawaynta iyo adeegyada.
- U qoondee qof, si sharci ah, inuu isagoo adiga ku matalaya adeegsado xuquuqda kor ku xusan, haddii aad awoodi karin inaad adigu samayso.

## Waajibaadka bukaan

**Haddii aanu nahay Swedish, waxaanu doonaynaa i aad qayb firfircoon ku yeelato daryeelkaaga caafimaadka. Markaad bukaan Swedish jooga tahay, waxaad leedahay masuuliyadaha:**

- Bixiso macluumaad dhammaystiran oo sax ah oo ku saabsan taariikhdaada caafimaad iyo baahiyaha isgaadhsiinta dadka ku lugta leh daryeelkaaga.
- Kaqaybqaadato go'aanada la xidhiidha daryeelkaaga iyo daawayntaada.
- Waydiiso su'aalo ku saabsan hawlaha iyo hannaanyada aadan aqoonta u lahayn.
- Ku wargeliso dhakhtarkaaga ama kalkaalisada wixii isbeddel ah ee ku yimaad caafimaadkaaga.
- Raacdo qorshaha daryeelka ee daawayntaada.
- Ka fikir dadka kale ee bukaanada ah oo caawi hubinta in dadka ku soo booqanaya ay sidoo kale ka fikiraan.
- Qaddariso xeerarka cusbitaalka iyo shaqaalaha.
- Qorshaysato qaabka aad lacagta u siinto doonto cusbitaalka lagu dhigay.
- Qaddariso daryeelayaasha iyo inaad dhawrto sharciyada cusbitaalka; tani waxay inaga caawinaysaa sidii aan kuu siin lahayn bey'ad lagu badbaado oo aan kuugu qabano daryeelka ugu fiican. Marar dhif ah meesha uu bukaanu wiiqo jawiga badbaado, dhakhtarka ayaa la ogaysiinaa iyadoo cusbitaal-ka-saarisna dhici karto.



## Liiska warbixinta bukaanka

**Waxaan rabnaa in joogitaankaada cusbitaalka iyo bogsashadaadu inay si wanaagsan ku dhammaadaan. Waxaa laguugu dhiirigalinayaa in ad dooratid xubin ka tirsan qoyska ama saaxiib si uu kuu taageero oo u waxna uga ogaado daryeelkaaga. Adiga iyo qofka taageerada bixiya waxaad kaalin muhiim ah ka qaadani doontiiin raysashadaada.**

**Fadlan sax saar sanduuqyada hoose marka aad dhammaystirto oo qor wixii su'aal aad qabto.**

Qofka taageerahayga ah waa: \_\_\_\_\_

Lambarka telefoonkaygu waa: \_\_\_\_\_

Waxaan filaa in aan ka baxo cusbitaalka: \_\_\_\_\_

Gaadiidkayga (safarka guriga) waxa la ii diyaariyey: \_\_\_\_\_

Waxaan soo galay cusbitaalka maxaa yeelaay: \_\_\_\_\_

**Inta aan halkan joogo...**

- Waan fahamsanahay dawooyinkayga, daawaynaha iyo tijaabooyinka.
- Waan roonahay ilaa inta suurtoogalka ah.
- Waxaan kaqaybgalayaa hawlaha maalinlaha ah ilaa inta suurtoogalka ah.

**Ka hor inta aanan bixin...**

- Waan ogsoonahay daawooyinka aan u baahanahay in aan qaato, sababta, iyo waxyeelooyinka (daawooyinka) loo baahan yahay in aan la socdo. Waan ogsoonahay sida loo qaato iyo meesha laga soo qaato.
- Waan fahamsanahay xaaladdayda/cudurkayga iyo calaamadaha loo baahan yahay in aan sheego.
- Waan ogsoonahay hawlaha badbaado ii ah.
- Waan ogsoonahay waxa aan cuni karo.

**Isu-diyaarinta bixidda...**

- Waxaan leeyahay qorshe inaan helo wixii qalab aan u baahan karo.
- Waan ogsoonahay dhakhtarka (dhakhaatiirta) loo baahan yahay in aan waco oo aan haysto nambarka (nambarrada) telefoonkooda.
- Waa la qabtaa ballamahayga la-socodka.
- Waa laga jawabay su'aalahayga.

## Arrimaha biilasha

Marka aad isku diyaarinayso inaad guriga aaddo waxa aad qabi kartaa su'aalo ku saabsan qaanta cusbitaalka. Miyaa caymiskayga qaanta lagu dallacaya? Imisa ayey tahay inaan bixiyo (lacag)? Maxaa dhacaya haddii aanan dhammaan wada bixin karin mar qudha? Fadlan wixii su'aalo ah kala soo xidhiidh xafiiskayaga ganacsiga telefoonka 206-320-5300, ama telefoonka lacag la'aanta ah 1-877-406-0438. Haddii ay kuu dhibyar tahay, waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa ama ku bixin kartaa qaanta barta internetka: [Swedish.org/billing](http://Swedish.org/billing).

### Bixiyayaasha waaweyn ee kale ee la xidhiidha:

- AMR (Ambalaaska) 800-913-9106
- Cellnetix 800-374-4045
- LabCorp 888-680-4140
- US Anesthesia Partners – Washington 888-900-3788
- Pacific Anesthesia (Edmonds campus) 425-407-1500
- Radia Imaging 888-927-8023

### Kaalmada dhaqaale

Swedish waxay daryeeshaa dadka iyo baahida caafimaadkooda haddii ay bixin karaan iyo haddii kaleba. Waxaanu kala shaqayn bukaanadeena wixii arrimo dhaqaale ah, oo ay ku jiraan helitaanka habab aanu uga dhigno daryeelka caafimaadka mid la awoodo bixinta lacagtiisa. Cusbitalada Swedish waxay siiyaan caawinaad dhaqaale buknaanada u qalma ee aan awoodin bixinta qaanta caafimaadkooda. Haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta lacagta dhammaan ama qayb ka mid ah daryeelka caafimaadkaaga, fadlan kala hadal u-doodaha dhaqaalaha bukaanka ama wakiilka adeegga macaamiisha waxyaalaha ku saabsan sida aanu kuu caawin karno. Waxaa lagala xadhiidhi karaa telefoonka 877-406-0438 ama bartayada internetka [Swedish.org/patient-visitor-info/billing](http://Swedish.org/patient-visitor-info/billing).



## Faallooyinka iyo walaacyada

### **Faallooyinka ama walaacyada ku saabsan joogitaankaaga Swedish**

Swedish Medical Center waxa uu leeyahay hannaan ay bukaanadu ku awoodaan in ay codkooda ka dhiibtaan wixii welwel ah iyadoo aanay ka cabsi qabin in wax khatara daryeelkooda soo gaadho. Haddii adiga ama xubin qoyskaaga aad qabtaan cabashooyin ku saabsan daryeelka caafimaadka ee aad ka hesheen cusbitaalkayaga, fadlan ha ka cabsan inaad kala hadasho maareeye ama xubin shaqaale oo kasta oo joogta waaxdaada. Waxaan ku dadaalaynaa inaanu xallino arrimo kasta oo aanad ku qancin sida ugu dhakhsaha badan inta aad joogto.

### **Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa:**

#### **Arrimaha daryeelka caafimaadka:**

Clinical Quality Investigations (clinical-care issues)  
747 Broadway  
Seattle, WA 98122-4307 206-386-2111  
Emeyl: SMC-CQI@swedish.org

#### **Arrimaha aragtida uu macmiilku ka qaatay:**

Haddii aad ka qabto wax welwel ah, cabashooyin, ama aqoonsi wanaagsan arrin kasta oo aan caafimaad ku xidhnayn ee adiga joogitaankaaga cuosbitaalka, fadlan emeyl u soo dir:  
CustomerExperience@swedish.org

Waxaad xaq u leedahay sidoo kale inaad la xidhiidho Waaxdka Caafimaadka Gobolka Washington, ama inaad la soo xidhiidho Hay'ada Qiimaysa cusbitaalkayaga, Det Norske Veritas (DNV) wixii walaac ah ee khuseeya joogitaankaaga cusbitaalka.

Washington State Department of Health  
Health System Quality Assurance  
Complaint Intake  
P.O. Box 47857  
Olympia, WA 98504-7857  
1-800-633-6828  
Emeyl: HSQAComplaintIntake@doh.wa.gov

Det Norske Veritas (DNV)  
DNV-GL Healthcare  
Attn: Hospital Complaints  
400 Techne Center Drive, Suite 100  
Milford, OH 45150  
1-866-496-9647  
Emeyl: Hospitalcomplaint@dnvgl.com

### **Haddii aad tahay qof wax ka hela Medicare:**

Haddii aad tahay qof wax ka hela Medicare oo aad walaac ka qabto tayada daryeelka, kafayntaada Medicare ama hore lagu saaro, waxaad la xidhiidhi kartaa KEPRO:

KEPRO  
1-888-305-6759  
TTY: 1-855-843-4776

### **Walaacyada la xidhiidha rugaha caafimaadka, fadlan la xidhiidh:**

Swedish Medical Group (clinics)  
Ku hagaaji walaacyada maamulaha rugta ama xidhiidhada bukaanka: 206-215-2979  
Emeyl: SMG-PatientRelations@swedish.org

# Ogaysiinta xuquuqda takoor la'aanta iyo helitaanka

Waxaan u hoggaansannahay sharciyada xuquuqda madaniga ah ee khuseeya ee federaalka iyadoo aananu samaynayn takoor ku salaysan qoomiyadda, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da, naafonimada ama jinsiga. Swedish kama tagto dadka ama ulama dhaqmaan dadka si gaar ah sabab ku salaysan qoomiyadda, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da, naafonimada ama jinsiga. Swedish:

- (1) Waxay siisaa qalab iyo adeegyo bilaash ah dadka naafada ah si ay si hufan noola xidhiidhaan, sida:
  - (a) Turjumaano luuqadda dhegoolaha oo muhtarif ah; iyo (b) Macluumaad ku qoran qaabab kale (farta waawayn, cod duuban, qaabab elektarooniga ah ee la heli karo, qaabab kale).
- (2) Waxay siisaa adeegyada luuqadda oo bilaash ah dadka luuqaddooda koowaad aanu Ingiriisiga ahayn, sida: (a) turjumaano muhtarif ah; iyo (b) Macluumaad ku qoran luuqado kale.

Haddii aad u baahan tahay mid ka mid ah adeegyada kor ku xusan, fadlan la xidhiidh isku-duwaha xuquuqda madaniga ah ee ku habboon ee hoos ku dhigan. Haddii aad u baahan tahay Adeegyada Gudbinta War-Isgaadhsiinta, fadlan wac 1-800-833-6384 ama 7-1-1.

Haddii aad is leedahay Swedish waxa ay ku guuldarraysatay inay bixiso adeegyadan ama ay kuu takoortay si kale oo ku salaysan qoomiyadda, midabka, waddanka qofku ka soo jeedo, da'da, naafonimada ama jinsiga waxaad ka faylgaraysan kartaa cabasho Swedish adigoo la xidhiidhaya isku-duwaha xuquuqda madaniga ee goobta adeegga sida hoos ku qoran:

Goobta adeegga	Isku-duwaha xuquuqda madaniga
Dhammaan goobaha laga reebo Swedish Edmonds	Civil rights coordinator, 101 W. 8th Ave., Spokane, WA 99204 Telefoon: 1-844-469-1775; Khadka turjumaanka: 1-888-311-9127 Emeyl: Nondiscrimination.WA@providence.org
Swedish Edmonds	Civil rights coordinator (Bed Control), 21601 76th Ave. W. Edmonds, WA 98026 Telefoon: 1-844-469-1775; Khadka turjumaanka: 1-888-311-9178 Emeyl: Nondiscrimination.SHS@providence.org
Adeegyada duqaha	Civil rights coordinator, 2811 S. 102nd St., Suite 220, Tukwila, WA 98168 Telefoon: 1-844-469-1775; Khadka turjumaanka: 1-888-311-9127 Emeyl: Nondiscrimination.pscs@providence.org

Waxaad ku faylgarayn kartaa cabasho adigoo yimaadda goobta ama soo dira warqad, fagas ama iimeyl. Haddii aad u baahan tahay caawimo faylgaraynta cabasho, mid ka mid ah isku-duwayaasha xuquuqda madaniga ee sare ku xusan ayaa diyaar kuu ah.

Waxaad sidoo kale ka faylgaraysan kartaa cabasho xuquuqda madaniga ah Waaxda Maraykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah, si elektarooni ah adigoo maraya Xafiiska Xidhiidhka Xuquuqda Madaniga, oo aad ka heli karto <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, iimeylka ama telefoonka:

U.S. Department of Health and Human Services  
200 Independence Ave. SW  
Room 509F, HHH Building  
Washington, DC 20201  
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabashada waxa laga heli karaa <http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html>.



We do not discriminate on the basis of race, color, national origin, sex, age, or disability in our health programs and activities.

ATENCIÓN: Si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711).

注意：如果您講中文，我們可以給您提供免費中文翻譯服務，請致電 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711)

CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí có sẵn dành cho bạn. Gọi số 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711).

PAUNAWA: Kung nagsasalita ka ng Tagalog, maaari kang gumamit ng mga serbisyo ng tulong sa wika nang walang bayad. Tumawag sa 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711).

주의: 한국어를 사용하시는 경우, 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711) 번으로 전화해 주십시오.

ВНИМАНИЕ: Если вы говорите на русском языке, то вам доступны бесплатные услуги перевода. Звоните 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (телетайп: 711).

ՈՒՇԱՒԴՈՒԹՅՈՒՆ. Եթե խոսում եք հայերեն, ապա ձեզ կարող են տրամադրվել լեզվական օգնություններ անվճար ծախսություններ: Չանգահարեք 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (հեռախոս (TTY) 711)։

يُرجى الانتباه: إذا كنتم تتكلمون اللغة العربية، فأعلموا أن خدمات المساعدة اللغوية متوفرة مجاناً لكم. اتصلوا برقم الهاتف 888-311-9127 أو برقم الهاتف 888-311-9178 عند الاتصال بالمركز الطبي السويدي في إدموندز (Swedish Edmonds) [(أو بخط المبرقة الكاتبة TTY لضعاف السمع والنطق على الرقم 711)].

توجه: اگر به زبان فارسی صحبت می کنید، تسهیلات زبانی بصورت رایگان برای شما فراهم می باشد. با شماره 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY:711) تماس بگیرید.

注意事項: 日本語を話される場合、無料の言語支援をご利用いただけます。888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY:711) まで、お電話にてご連絡ください。

ਧਿਆਨ ਧਿਓ: ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਪੰਜਾਬੀ ਬੋਲਿ ਰੇ, ਤਾਂ ਤਾਮਾ ਧਵਿੱਚ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾ ਤੁਹਾਡੇ ਲਈ ਮੁਫਤ ਉਪਲਬਿ ਹੈ। 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

ສូਚනາການຮູ້: ບຼສິນເປື່ອນກຸກຮີຍາຍກາ ສາໂຂຸ ເສາ: ເສກນີ້ສູ່ຍື່ນຜູ້ກາສາສິນຮາສູ່ຜູ້ ເລກກຸກ ເຜ້າຍສັດຕິດໂຊ້ 1 ສູ່ຍື່ນສູ່ເອໂເຂ 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711) 1

ध्यान दें: यदि आप हिंदी बोलते हैं तो आपके लिए मुफ्त में भाषा सहायता सेवाएं उपलब्ध हैं। 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711) पर कॉल करें।

LUS CEEV: Yog tias koj hais lus Hmoob, koj tuaj yeem siv cov kev pab txhais lus pub dawb. Hu rau 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711).

โปรดทราบ: หากคุณพูดภาษาไทย คุณสามารถใช้บริการ ความช่วยเหลือทางภาษาได้โดยไม่มีค่าใช้จ่าย โทร 888-311-9127 (Swedish Edmonds 888-311-9178) (TTY: 711)

## Fiiro gaar ah

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---



BUKAANKA LEO OO XUBIN LOOGU GALIYEEY SWEDISH IYO GABADHIISA (INANTIISA), MARIA

## Deeqsinimada aan caadiga ahayn waxay suurto galisaa imaanshaha wakhtiyadan oo kale

Leo waxa uu u yimid Swedish si uu uga helo caawimo markuu u baahnaa in loo galiyo kelli. Fikirka halabuurka leh ee kooxdiiisa daryeelka ayaa naftiisa badbaadisay.

Deeqsinimadaada yaaa daryeelka caafimaadka ee aan caadiga ahayn ka dhigta suurto gal iyadoo bukaanada sida Leo oo kale siisa rajo.

**Hadda ugu deeq [Swedishfoundation.org/generosity](https://www.swedishfoundation.org/generosity).**



**SWEDISH**  
MEDICAL CENTER  
FOUNDATION

206-386-2738 | [Foundation@swedish.org](mailto:Foundation@swedish.org) | [Swedishfoundation.org](https://www.Swedishfoundation.org)

*Maadaama urur aan faa'iido doonayn uu yahay, ugu deeqistaada Swedish waxay tahay canshuur-la'aan sida uu oggol yahay sharcigu. Waad ku mahadsan tahay deeqsinimadaada.*



**BALLARD**

5300 Tallman Ave. NW  
Seattle, WA 98107-3932  
**T** 206-782-2700

**CHERRY HILL**

500 17th Ave.  
Seattle, WA 98122-5711  
**T** 206-320-2000

**EDMONDS**

21601 76th Ave. W.  
Edmonds, WA 98026-7507  
**T** 425-640-4000

**FIRST HILL**

747 Broadway  
Seattle, WA 98122-4307  
**T** 206-386-6000

**TDD/TTY:** 206-386-2022

**Swedish.org**

**ISSAQUAH**

751 NE Blakely Drive  
Issaquah, WA 98029-6201  
**T** 425-313-4000

**MILL CREEK**

13020 Meridian Ave. S.  
Everett, WA 98208-6422  
**T** 425-357-3900

**REDMOND**

18100 NE Union Hill Road  
Redmond, WA 98052-3330  
**T** 425-498-2200